
# Dugsiga Ururka Wallonia-Brussels

Buuga warbixinta

## arimaha iskuulka ee loogu talagalay waalidiinta soogalootiga ah

SOMAALI





Mashruuca Laanqeyrta Cas ee Beljimka – Sanduuq-maaliyadeedka Yurub ee Qaxootiga Dib u akhritaan iyo saxitaan uu sameeyay Agaasimaha Guud ee Waxbarashada Waajibka ah. Buugan waxa lagu turjumay luqadaha kala duwan ee ah:Ingiriis, Ruush, Carabi, Farsi, Serbo-Croatian, Jarmal, Albani, Pashto iyo Somaali

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés
Dukumiintigan waxa uu ku suurtoobay ama uu ku hir galay caawimaada maaliyadeed ee midowga yurub. Waxyaabaha ku dhigan dukumintigan gudihiisa waxa ka mas'uul ah oo kaliya Laanqeyrta Cas ee Beljimka, Beesha Faransiiska, sinaba looma tixgelin karo inay Midowga Yurub ka tarjumeyso mowqifka.

FÉDÉRATION WALLONIE-BRUXELLES
Iyadoo lala kaashanayo ururka Wallonia-Brussels



CROIX-ROUGE de Belgique
www.croix-rouge.be

Jean-Jacques

































**Isuduwida :**
Madeleine Kirsch
Maamulaha tababbarka ee Laanta soo dhawaynta magangalyo-doonka ee Laanqayrta Cas ee Beljamka

Emilien Clonan
Isu-duwaha mashruuca EPIS iyo iskuul dhigashada ee Laanta soo dhawaynta magangalyo-doonka ee Laanqayrta Cas ee Belgium

**Hir galinta :**
Emilien Clonan

**Soo sawiraada :**
Shaqo sawirka buuga waxaa si wadajir ah u sameeyay xafiiska maamulka dugsiga Farsamada gacanta ee ku magac dheer «Félicien Rops» oo ku yaal magaalada Namur, iyo kooxda nidaamka wax barashada iyo ardayda dugsigaas (iyada oo aan la ilaawin dadaalka uu la yimid M. Paris ee ITCF Henri Maus).

France Martin

**Nidaamka tixgalinta sawirada (Graaphismiga), naqshada, daabacaada :**
La Maison du Graphisme -Theux

Mahad celin

Evelyne Dogniez
Agaasimaha laanta qaabilaada Magangalyo-doonka ee Laanqayrta Cas ee Beljimka

Shaqaalaha Laanqayrta Cas, macalimiinta iyo maamulada dugsiyada, aqoonyahannada waxbarashada (Wakiilada Xarunta PMS, kormeerayaasha ...) iyo Henryk Chojnacki (xaruunta Fedasil ee Rixensart) oo qeexay nuxurka buugan

Agaasinka Guud ee Waxabarashada Waajibka ah inta uu si taxaddar leh u akhriyay buugan oo dib loo cusbooneysiiyay wakhtigii dayrta 2015

Dhamaan dadka kale ee dib u akhriyey ama kormeeray shaqada ku saabsanayd soo saaritaanka buugan.

Laanqayrta Cas ee Beljimka waxay khaas u leedahay xuquuqaha isticmaalka ama dib u soo saarista qoraalkan iyo tusaalooyinkan inta dhaafsan wargalinta shacabka loogu talagalay.

Tafatiraha Mas'uulka ah: D. Sondag-Thull, rue de Stalle 96, B-1180 Bruxelles
© Laanqayrta Cas ee Beljimka – dib u daabicida 2015

Dhamaan ficilada ay fuliso (gargaarka qaran iyo kan caalamiga ah, ku-deeqida dhiiga, waxqabadka bulshada ee maxaliga ah, ficillada dhalinyarada, qaabilaadda magangalyo-doonka, iwm.), Laanqayrta Cas ee Beljimku waxay iniga rabtaa garab siis . Hadaad rabto inaad naga caawiso gargaarka kuwa baahan, nala soo xiriir.

www.croix-rouge.be

Mahadsanid.

Waalidiinta qaaliga ah,

# soo dhawaada!

Laanqayrta Cas ee Beljimku waxay soo dhaweysaa dadka magangalyo-doonka ah mudo ka badan 30 sano. Taageerada shaqsiyeed aan fulino ayaa ah mid xoojisa caawimaada joogtada ah aan ku dhex bixino xarunta.

Waxaan rabnaa in qof walba uu fahmo oo uu laqabsado duruufihiisa nololeed ee cusub, waan kuna dadaalnaa in ay waalidiintu helaan taageero ku saabsan waxbarashada carruurtooda. Shaqaalaha xaruumahayaga soo dhawaynta ee inii weheliya ayaa si joogta ah u qabtaa hawshaas.
`

Dugsigu waa goob hodan ah oo cayiman: waxa uu ku yaalaa adduunka oo dhan laakiin qaabab aad u kala duwan ayuu ka samaysan yahay. Beljimka, waxbarashada khasabka ah waxay khusaysaa dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 5jirr iyo 18 jirr. Sidaa darteed Dugsigu waa mid ka mid ah meelaha ugu horreeya aan aadno marka aan ku nool nahay Beljimka. Iskuul diwaangalinta caruurtaada iyo u dhiibida carrurtaada dad shisheeye waa arimo aan la garaneyn waxa ka soo bixi doona oo hadana u baahan kalsooni.

Su'aalo badan ayaad iswaydiin kartaa: Waa kuwee dadka uu ilmahaagu la kulmi doono, waa maxay doorarkooduna? Sidee u taageeri karaa cunugayga uguna dhiirigalin karaa waxbarashadiisa? Khaas ahaan, iskuul-aaditaanku muxuu u faa'iidayn kara cunugayga iyadoo aan la hubin in uu joogayo Beljimka? Cidee taageero an waydiisan karaa hadii ay wax qaldamaan? Anaga oo ka jawaabayna su'aalahan, waxaan rajeyneynaa inaan inii fudaydino habkaad u gudan doontid doorkaaga waalidnimo sida ugu wanaagsan adigoo xasillooni ku qaba xaaladan cusub.

Waxaan u mahadcelineynaa Ururka Wallonia-Brussels iyo Sanduuq-maaliyadeedka Yurub ee qaxootiga loogu tala galay oo naga caawiyay abuurista buug-yarahan. Waxaan sidoo kale uga mahadcelineynaa kalsoonidooda iyo dadaalkooda awgeed, macallimiinta, oqoonyahaanada weheliya soogalootiga, wakiilada xarunta cilminafsi-bulsheed iyo ururada waalidiinta ee kaqeybqaatay abuuritaanka buugan.

Akhris wacan!

**Evelyne Dogniez**
Agaasimaha laanta qaabilaada
Magangalyo-doonka ee Laanqayrta
Cas ee Beljimka

# Bandhiga khoraalka


Ereyga soo dhaweynta ........ 5

**Dugsigu muxuu u soo kordhin karaa ilmahayga ........ 7**
Barashada ku hadalka,akhriska iyo qorista ........ 7
Helitaanka shahaadooyinka et shaqo qabashada fudud ........ 7
Barashada Beljimka iyo xoojinta is dhexgalkaaga ........ 7

**Xuquuqda iyo waajibaadka waalidiintu maxay yihiin ? ........ 8**
**Maxay yihiina kuwa iskuulku ? ........ 8**

**Sidee loo abaabulay nidaam dugsiyadeedka Beljimka ........ 12**
Saddexda qoomiyadood.ee Beljimka ........ 12
Dugsiyada rasmiga ah iyo dugsiyada xorta ah ........ 12
Dugsiga Beljimku wuxuu u qaybtamaa saddex xubnood ........ 13
Dugsiga xannaanada ........ 13
Dugsiga hoose ........ 13
Dugsiga Dhexe ........ 14
Waxbarashada gaarka ah ........ 14
Waa maxay DASPA? ........ 15
Ilmahaygu ma gali karaa DASPA ........ 15
Ayaa ka shaqeeya iskuulada Beljimka ........ 15

**Macluumaad munaafacaad leh ........ 18**
Sidee u diwaangelin karaa cunugeyga? ........ 20
Waa sidee sanad dugsiyeedka Beljimku? ........ 21
Waa sidee usbuuca dugsiga la aado? maalintana? ........ 22
Maxey yihiin xeerarka ixtiraamka fasalka? ........ 23
Maxay yihiin ganaaxyadaa ka dhasha u hogaansan la'anta xeerarkan? ........ 23
Sidee casharada isboortiga loo qabtaa? ........ 24
Waa maxay buuga war bixinta fasalka? ........ 24
Ayay yihiin, maxayna qabtaan dhexdhexaadiyeyaasha dugsiga? ........ 25
Cidee la xiriiri karaa haddii ilmahaygu leeyahay dhibaatooyin? ........ 26
Cidee la xiriiri karaa haddii aan dhibaatooyin kale ku qabno dugsiga? ........ 27
Maxaan samayn karaa haddii aan guuro? ........ 28
Xagee baan ka baran karaa faransiiska? ........ 28
Xagee ka heli karaa macluumaad kale? ........ 29

**Hingaadista iyo sharaxaada shahaadooyinka ........ 30-31**


F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés


# Dugsigu muxuu u soo kordhin karaa ilmahayga?

**Aadista iskuulka waxay u fasaxaysaa cunugeyga inuu barto ku hadalka, akhrinta iyo qorista.**

Beesha Faransiiska ee Belgium dhexdiisa, waxaa muhiim ah in maalin kasta lugu hadlo, la fahmo, la akhriyo, lana qoro luqada Faransiiska.
Si uu cunugaygo u la socon karo cashirada, asxaab u yeelan karo, tareenka u raaci karo, dukaanada waxa uu rabo ka soo gadan karo, uu buxbuuxin karo waraaqaha maamul dowladeedka, uu qori karo waraaqaha uu rabo, waa lama huraan in uu luqada faransiiska oqoon u yeeshaa.
Akhri, ku hadal, fahan iyo qor luqada faransiiska waxay kuu fasaxaysaa shaqo helitaan fudud. Wakhti iyay u baahantahay si uu cunugaygu u baran lahaa ulana qabsan lahaa luqada faransiiska.


**Iskuul aaditaanku wuxuu fursad u siinayaa cunugeyga in uu qalin jabiyo oo shahaadooyin uu qaato, yeesho xirfado badan, oo si fududna shaqo u heli karo.**

Beljimka dhexdiisa si shaqo loo helo, waxaa muhiim ah in wax barasho la aado. Shahaadadu waa dukumenti cadeynaya in cunugeygu uu wax bartay uuna bartay aqoon iyo xirfado. Shahaadadaas waxaa laga qaataa iskuulka. Aayihiisu siduu noqdaba, ogow wax kasta oo ilmahaygu ka barto dugsiga in ay anfici doono.



**Aadista iskuulka waxay u fududaynaysaa cunugeyga inuu barto wadanka uu ku nool yahay.**

Dugsigu wuxuu u sababayaa cunugeyga in uu barto qiimaha Beljimka. Tusaale ahaan, cunugeygu wuxuu ku baran doonaa iskuulka dhexdiisa in Beljimku difaaco fikirka ah in ay dadku xornimo ku dhashaan ay una siman yihiin xuquuqda iyo waajibaadka iyadoonan loo eegeynin bulshada ay ka dhasheen, deegaanka ay ka soo jeedan, jinsiyadooda ama diintooda. Iskuulku wuxuu siinaya cunugayga fursad uu kula kulmo dadka kunool Beljimka, si uu cunugaygu u barto qaanuunka nolosha bulshada Beljimka, uuna ku dadaalo dhex galka bulshada.



# Waa maxay xuquuqdeena iyo waajibaadkeena hadii aan nahay waalid? Maxay yihiina kuwa iskuulkuna ?

**Beljimka dhexdiisa, dhammaan carruurta da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 18 jirr waxaa waajib ku ah inay aadaan dugsiga iyada oo dhalashadooda ama xaaladooda aduunyo aanan loo eegayn. Gabdhaha iyo wiilashu waxay aadaan dugsiga isla markaana casharro ayey isla qaataan.**





## Muxuu aaditaanka dugsigu waajib u yahay?

Beljimka dhexdiisa waa ka mamnuuc, in ay caruurtu shaqeeyaan. Ujeedada uu Beljimku ka leeyahay waajibaynta aaditaanka dugsiga waxa ay tahay in caruunta dhamaantood ka sinaadaan nassibka wax barashada iyo shaqo helitaanka marka ay waynaadaan. Waajibaynta dugsi aaditaanku waxay ku qeexan tahay sharciga Beljimka ee ku saabsan waxbarashada dugsiga ee Juun 29, 1983. Haddii sharcigaas la ixtiraamiwaayo ganaax iyaa jira.

**Qodobka 1aad. - § 1e.** Qofka da'da yar waxaa waajib ku ah waxbarashada khasabka ah muddo laba iyo toban sano, oo ka bilaabmaya sanad dugsiyeedka ay da'diisu gaadho lix sano, kuna dhamaanaya sannad dugsiyeedka da'diisu ay taagan tahay siddeed iyo toban sano.

**Sharciga 29 Juun 1983 ee ku saabsan waxbarashada khasabka ah.**



# Waajibaadka iyo xuquuqda waalidiinta

## Waajibaadka waalidiinta

Waalid hadaan ahay, waa inaan hubiyaa in ilmahaygu aado iskuulka maalin walba. Hadii uuna tagi karin iskuulkaas, waajibkaygu waa in aan ka wargaliyo iskuulka isla maalintaas. Intaa kadib, waa in aan caddeeyaa maqnaanshahiisa anigoo tixgelinaya mudada keenitaanka cadaystan uu sharcigu dhigayo. Tusaale ahaan, haddii cunuggaygu buko, waa inaan dugsiga u-geeyaa caddeyn dhakhtarka aan ka soo qaaday.



Waa in sidoo kale aan ogaado in cunugaygu uu sameeyo tababarka iyo casharada uu macalinku ugu soo dhiibo guriga. Haddii aanan ku hadli oqoon Faransiiska, waxaa muhiim ah in aan weydiiyo cunugeyga waxa uu sameynayo iyo haddii uu fahmayo waxa uu iskuulka ku soo dhigto. Hab dhaqankaas waxa uu inoo fuday'dinayaa aniga iyo macallimiintuba in aan la socon karno horomarka cunugayga.
Waa inaan sidoo kale tixgaliyaa macluumaadka uu iisoo gudbiyo dugsigu. Qaarkood aad ayey muhiim u yihiin. Macluumaadkan waxaa la iigu soo dirayaa boostada ama lagu soo qoraya buuga fasalka. (fiiri xaashada...)



Dugsi kasta, wuxuu sharcigu dhigayaa abuurka guddiga ka qeybgalka. Ujeedada golahani waa in la isu keeno jilayaasha kala duwan ee iskuulka (macalimiinta, agaasimayaasha, tababarayaasha, iyo waliba wakiilada waalidiinta iyo ardaydaba si looga wada tashado wanaajinta qiime-nololeedka dugsiga.

Saacadaha iskuulka la dhiganayo, ma gali karayo fasalada ardayda. Hadii aan rabo inaan la kulmo macalin, balan waa inaan waydiistaa.

## Xuquuqda waalidiinta.



Hadii aan rabo in aan la kulmo macallimiinta iyo/ama maamulaha dugsiga, waxaan xaq u leeyahay inaan codsado balan.

Haddii aan dareemo in cunugaygu dhibaatooyin kala kulmo xaga iskuulka, waxa aan xaq u leeyahay in aan waco xaruunta cilmi nafsiga-maskaxda-bulshada (ee PMS ku magac deer) inta lagu jiro waxbarashadiisa. (eeg bogga ...)

Waxaan xaq u leeyahay inaan ka mid noqdo ururrada waalidiinta. Ururada waalidiintu waa xiriirka u dhexeeya iskuulka iyo waalidiinta ardayda. Waxay gudbiyaan macluumaadka, waxay kaqaybqaataan fikirka mawduucyada waaweyn ee la xidhiidha dugsiga ...



# Waajibaadka iyo xuquuqda ardayda

## Waajibaadka ardayda


Dugsi kastaa wuxuu leeyahay qaanuun loo yaqaan Xeerarka arimaha gudaha (kuna mag dheer « Règlement d'Ordre Intérieur » ama ROI). Ujeedada xeerarkan ayaa ah in la dajiyo sharciyo qaarkood si loo wanaajiyo nolosha dadka iskuulka jooga.




Dhamaan ardayda iyo waalidiinta waxaa waajib ku ah in ay ku dhaqmaan xeerarkan.

**Inta badan, xeerarku waxay dhigayaan sidatan :**

- Ardaydu waa in ay ixtiraamaan dadka waaweyn ee dugsiga jooga, iyo ardayda kala ay dugsiga wada joogan (wiilasha iyo gabdhahaba).
- Wax rabshad ah (af ama jir ah) looma dulqaadan karo
- Aflagaadada iyo odhaahda cunsuriyadaysan waa mamnuuc.
- Qolalka dugsiga iyo qalabka dhex yaal waa qaali. Ardaydu waa inay dhawraan kuwaas. Haddii cunuggaygu jebiyo ama faraxumeeyo qolalkaas iyo qalabkaas, waxaa la i weydiin doonaa in aan anigu bixiyo lacagta lugu hagaajinayo dhibtaas.
- Ardaydu waa in ay fuliyaan hawsha ay macallimiintu u diraan.



## Xuquuqda ardayda

Way dalban karaan in ay la kulmaan macalimiinta.

Waxay ka codsan karaan macalimiinta sharaxaad dheeri ah.




Waxay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay, si xasilooni ah, ugu dhex-dhigtaan casharadooda goobaha wax barashada ku habboon.

Waxay xaq u leeyihiin in ay fikiradooda dhiibtaan iyaka oo ixtiraamaya fikirada dadka kala (ardayda kala iyo shaqaalaha iskuulka).

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

# Waajibaatka iyo xuquuqda macilimiinta iyo iskuulka

## Macalimiintu waa in ay:


Sameeyaan sidii ixtiram loogu yeelan lahaa, waana inay muujiyaan awoodooda macalinimo iyakoo dhawraya sharafta iyo damiirka ardayda





Wakhti siiyaan sharaxaada cashirka ee ardaydu rabto

## Macalimiintu waxay xuquuq u leeyihiin in ay:



- Ku qasbaan ardayda ixtiraam ku dhaqanka
- Ka dalbaan ardayda in ay dhigtaan cashiradooda (kolay ku ahaatana wakhtiyada fasaxa).
- Si xaq ah u ganaaxi karaan ardayda.
- Codsan karaan lakulanka waalidiinta ardayda.



## Dugsiyadu waa in ay:

- Diwaangaliyaan ardayda inta ay qaabili karaan.
- Diyaariyaan mashruuc dugsiyeed oo la cusboonaysiiyo sadexdii sanaba mar.
- Warbixiin ka tabiyaan markay ardaydu dhaafto tirada maalmaha ay maqnaan karaan bilaa cadays. Nidaamka loo xisaabiyo maqnaashaha ardayda waa tiro nus-maalmeed. Haddii cunugaygu uu ka maqnaado iskuulka maalin, waxay u dhigantaa in uu maqnaa laba nus-maalmeed.

Marka ay **tahay dugsiga hoose**, haddii ilmahaygu **maqnaado 9 nus-maalmood** maamulka iskuulku waa inuu la socodsiiyaa Agaasinka Guud ee Waxbarashada Waajibka ah.

Marka ay tahay **dugsiga dhexe**, hadii cunugaygu uu **maqnaado 10 nus-maalmood**, maamulka iskuulku waa inuu la socodsiiyaa Agaasinka Guud ee Waxbarashada Waajibka ah
Marka la joogo qaybta labaad ee dugsiga dhexe, ardayga (da'ada yar iyo ka qaan gaadhayba) maqnaada 20 nus-maalmood sanad dugsiyeedka dhexdiisa waxa ka lumaya magaca «ardaynimada joogtada ah».
Ardaygaas waxuu noqonaya arday «madax banaan» oo imtixaanadiisa iskuulka aan marikarayn. Taas macneheegu waxa ay tahay in sanad dugsiyeedkiisaa aan loo qiimeyneen isaguna safalka sare aan aadi karayn, goobtaas ayuu ku hadhayaa.

Hadii ilmahaygu iskuulka diido waxaan la xidhiidhi kara xafiisyo xal ila raadiya kuwaas oo ah xafiiska PMS ama xafiiska xal raadiska dugsiyadeed markuu cunugaygu dhigto dugsiga dhexe.

## Dugsiyadu waxay xuquuq u leeyihiin in ay :

Ganaax saaraan ardayga ku dhaqmiwaaya xeerarka iskuulku uu leeyahay. Ganaaxaas wuxuu ku qeexanyahay qanuunka arimaha gudaha ee dugsiga (ROI).





CROIX-ROUGE de Belgique

# Sidee ayaa loo abaabulay nidaam dugsiyadeedka Beljimka?

## 3 qoomiyadood

Beljimku waxa uu leeyahay **sadex qoomiyadood iyo sadex luqadood.**
- Qoomiyada faransiiska ama ururka Wallonia-Brussel(oo ku hadasha luqada faransiiska),
- Qoomiyada jarmalka (oo ku hadasha luqada jarmalka),
- Qoomiyada falaamishka (oo ku hadasha luqada nederlandiiska).

Xagan waxaan ka hadlaynaa nidaamka iskuulka ee qoomiyada faransiiska ama **ururka Wallonia-Brussel**


## Dugsiyada rasmiga ah iyo dugsiyada xorta ah

Beljimka dhexdiisa, waalidadu way u madax banaan yihiin doorasha dugsiga ay la rabaan caruurtooda. Iyadoo sidaas ay tahay ogaada in ay dugsiyadu daafi karayn quwadooda ku saabsan qaabilaada ardayda.

Dugsigu waa labo nooc: Dugsiga rasmiga ah iyo dugsiga xorta ah

Dugsiga rasmiga ah waxa uu si toos ah ugu tiirsan yahay dawlada, ha ahaato Beesha Faransiiska si toos ah ama degmada ama gobolka. Dugsigaas kuma xidhno diin ama falsoofiyad gaar ah laakiin waxa uu ogolyahay fursada lugu dooran karo dhigashada casharada ku saabsan diinta (diinta islaamka ama diinta yuhuuda ama diinta masiixiga ay ka tirsanyihiin katoolig iyo protestan iyo ortodogs) ama casharro akhlaaqeed (ardaydu waxay bartaan xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka, aasaaska dimuqraadiyadda, xorriyadda, wada hadalka, fikirka muhiimka ah ...). Bishii sagalaad ee 2015 (septembar 2015) kadib, qaab waxbarasho oo ka duwan (kuna magac dheer EPA) ayaa loo habeeyey ardayda aan dooranin casharka diinta ama asharka akhlaaqeed. Sanadkii 2017 kadibna waxa waajib noqday dhigashada casharka muwaadinimo.

Dugsiga xorta ah wuxuu u kala baxaa labo nuuc oo ah iskuulada madaxa banaan ee diinta ku dhisan oo ay soo abaabuleen wadaado masiixiya ama ururo diimeed, iyo iskuulada madaxa banaan aan diiniga aheyn oo ay soo abaabuleen ururada hanooninta tacliinta gaarka ah.



## Dugsiga Beljimku wuxuu u qaybtamaa 3 dabaqadood

**Dugsiga xanaanada**: wuxuu khuseeyaa caruurta da'doodu u dhaxayso 2 ½ iyo 5 sano

**Dugsiga hoose** : wuxuu khuseeyaa carruurta da'doodu u dhaxaysa 6 iyo 11 sano

**Dugsiga dhexe** : wuxuu khuseeyaa carruurta da'doodu u dhaxaysa 12 et 18 sano

Dabaqad kasta oo la joogo, waxaa jira ujeedooyin waxbarasho oo la doonayo in la gaaro.

Gabdhaha iyo wiilashu waxay aadaan isku dugsi casharro isku mid ah ayey isla qaataana.

**Dugsiga xanaanadu wuxuu barayaa cunugayga macnaha iskuulka (2 ½ iyo 5 jir).**


Wuxuu baran doonaa wada noolaashaha, iyo akhrintaka oo si tartiib le loo barayo, qorista iyo xisaabtana ciyaar ahaan iyaa lugu baraya. Dugsigani waajib ma aha laakiin wuxuu u fasaxayaa cunugeyga siduu u baran lah luqada Faransiiska, una sii diyaariyo wax barashadiisa soo socota.

**Marka laga bilaabo dugsiga hoosee, iskuulku waa Waajib (6jir ilaa iyo 11 jir).**

Cunugeygu wuxuu ka baran doonaa dugsiga hoose akhritaanka, qorista iyo tirada isagoo baranaya maadooyin kale (saynis, afaf, taariikh-juqraafi ...).

Guriga wuxuu ku diyaarin doonaa shaqo ku saabsan : casharaan la dhigto iyo xiisado la xafido.

Dugsiga hoosee dhamaadkiisa oo ah qolka lixaad (6e), Cunagaygu wuxuu mari doona imtixaan ku magac dheer « Certificat d'Etudes de Base (CEB) ». Imtixaankaas waa muhiim, waxa lugu qaataa shahaado. Cunugaygu hadii uu ku aflaxo imtixaankaas, wuxuu u dalacayaa fasalka koobaad ee dugsiga dhexe ee caadiga ah, taasna waxa ay keenaysaa in iskuulkii hore uu iska badalo oo uu mid kale aado. Hadiise imtixaankan uu heli waayo, qolka lixaad iyu dib ugu celin ama wuxuu aadi qolka koobaad ee kala duwan (waa dugsiga dhexe oo ay wax ka dhiman yihiin).



# Sidee ayaa loo abaabulay nidaam dugsiyadeedka Beljimka?

**Dugsiga dhexe, iskuulku sidoo kale waa waajib. Dhowr wado ayaa jira (inta u dhaxaysa 12 jir ilamaa 18 jir)**

Sanadka u horeeya ee dugsiga dhexe, Cunugayga waxaa loo diiwaangalin fasalka ay oqoontiisu ku haboontahay iyadoo la fiirinayo shuruudii uu ku soo dalacay ee ahayd in uu mutaystay galitaanka qolka koobaad ee dugsiga dhexe ee caadiga ah ama galitaanka qolka koobaad ee dugsiga dhexe oo ay wax ka dhiman yihiin.

Sanadka sadexaad ee dugsiga dhexe, dhowr wado ayaa u banaan cunugayga, kuwaas oo ah :

- Shaqo diyaaritaan uu ka dhex baranayo qaybaha farsamada gacanta.
- wax barasho u fasaxaysa in uu aado ilamaa iyo tacliinta sara ee qaybaha kala-guurka ah ee ku magac dheer « sections de transition ».

Arday kasta oo haysta shahaadada dugsiga dhexe (shahaadada ku magac dheer CESS) xaq ayuu u leeyahay in uu aadi karo jaamacada ama wax barashada sare, marka laga reebo maadada cilmiga injineernimada taas oo u baahan helida shahaadada gaarka ah.

Markuu gaadho 15 jir cunuggaygu wuxuu baran karaa tababar farsamada gacanta ah uu ka dhex baranayo dugsiga iyo shirkada, kuwaas oo qaybtamaya wakhtiga ay wax barashada bixinayaan.

Beljimku wuxuu leeyahay **waxbarasho gaar** ah oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada u baahan taageero gaar ah.

- Waxbarashada gaarka ah waa waxbarasho ku haboon ardayda kabta dhibaatooyin qaarkood (sida dhibaatooyinka habdhaqanka, curyaanimada ...). Xarunta cilmi-nafsiga ee loo yaqaan 'Psycho-Medico-Social (PMS) iyaa jihayn karta cidii u baahan waxbarashada noocan ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah ka fiiri websitkan: **www.enseignement.be**

- Xaruumaha PMS shaqadoodu waxay tahay caawimaada caruurta, dhalinyarada iyo waalidiinta ardayda. Waxay isticmaalaan nidaamyo xoojiya horomarka ardayda, sidoo kale waxay ka qayb qaataan wanaajinta wax barashada iyo nolosha ardayda.
- Waan weydiisan karaa inaan la kulmo Xarunta PMS ee ka dhex shaqeysa dugsiga cunugeyga. Waana ii bilaash.

Su'aal kasta oo ku saabsan jiheynta tacliimeed ee cunugeyga, waxaan wici karaa dugsiga iyo sidoo kale xarunta cilmi nafsiga iyo caafimaadka maskaxda (PMS) ee ku xiran iskuulkan.




F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

## Waa maxay DASPA: Nidaamka soo dhaweynta iyo iskuul dhigashada ardayda dhawaan timid?

Iskuulada qaar waxay soo dhaweeyaan caruur fara badan oo ka kala timid wadamo shisheeye oo waxbarasho dugsiyeedku ku yartahay ama oqoon aysan u lahayn luuqada faransiiska iyo nidaamka dugsiyadeed ee Beljimka. Ardaydani waxay u baahan yihiin taageero qaarkood si ay uga faa'ideysan karan, sida ardayda kale ee wadankan, fursadaha horomarka ee laga helo waxbarashada. Ardayda dhawaan timid waxaa laga diiwaangalin doonaa dugsiga DASPA oo ay dhigan doonaan muddo u dhaxaysa hal toddobaad illaa 12 bilood ama ugu badnaan 18 bilood, muddadaas oo ay ka faa'iideysan doonaan kormeer gaar ah oo u fudaydinaya fahmaada iyo laqabsashada nidaam dhaqameedka iyo nidaamka tacliinta ee Beljimka. Waxaa kadib loo jihayn doonaa waxbarashada ku habboon. Markay macallimiintu qiyaasaan in ardaygu uu aadi karo fasalka "caadiga ah", waxaa shir u fadhiisanaya gudiga isdhexgalka. Xaalada ardayga markuu fiiriyo, gudigaas wuxuu go'aansanayaa in uu udiro ardaygaas fasal ama qoldugsiyeed u dhigma awoodiisa waxbarasho. Shahaado la oqoonsan yahay oo cadaynaysa in uu ka qalin jabiyay qolka DASPA ayuu helayaa. Kadib ardaygu uu ka tagaya DASPA oo dugsiga caadiga ah ayuu galayaa.


Waxaad ka heli kartaa websitkan iskuulada leh qolka soo daweynta iyo waxbarashada oo ku magac dheer « classe-passerelles » barta soo socota **http://www.enseignement.be/** kadib « l'école de A à Z », kadib « passerelles », kadib « classe-passerelles ».

**Is diiwaangalinta ama is qoritaanka fasalka DASPA….**
Ardayga ku cusub dalka, sharciyan waa, arday kasta oo yimid ama ku nool Beljimka wax ka yar hal sano, kaasoo da'diiso u dhaxaysa 2 iyo bar jir iyo 18 jir. Ardaygaas waa in uu noqdaa:


- Magangalyo doon, ama mid loo oqoonsaday qaxoontinimo, ama lasocda qof codsaday magangalyo ama loo oqoonsaday qaxooti.
- Mid codsaday oqoonsiga wadan-la'aan ama loo aqoonsadayba waddan-la'aan, ama u dhashay waddan horomare yare ama waddan la sheegay inuu ku jiro xaalad isbadal dhaqaale sida wadanada aasia qaarkood.

Liistada waxaa soo diyaariyey guddiga kaalmada horumarinta. Liiskan waxaad ka heli kartaa websaydhka **OECD**.


Ardayda ka soo qaadatay shahaado wadankoodii, waxay ka codsan karaan xafiiska sinaanta shahaadooyinka ee qoomiyada Faransiiska in uu qiyaaso shahaadadooda. Warbixin websitkan ka day : **http://www.seignement.be/** ka dibna «iskuulku wuxuu ka bilowdaa A ilaa Z», ka dibna «isbarbar dhig».



# Nidaamka waxbarashada ee qo




F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés





CROIX-ROUGE de Belgique

# Ayaa ka shaqeeya iskuulada Beljimka?


## Dugsiga xanaanada iyo dugsiga hoose.

Maamul dugsiyeed ku magac dheer « mudiir » iyaa jira. Wuxuu maamulaa dugsiga uuna qorsheeyaa nidaamka shaqada ee iskuulka.

Macalimiinta marka laga hadlo, waa rag iyo dumar oqoon u leh wax barashada u haystana shahaado la oqoonsan yahay. Dugsiga xanaanada iyo ka hoosoba, waxa ay dhigaan maadooyin badan. Wayna ilaaliyaan caruurta, kana qayb qaataan shirarka dugsiga, lana kulmaan waalidiinta wakhtiga ay waalidiintu shirayaan. Way la dadaalaan caruurta inta ay waxbarashada ku jiraan wayna caawiyaan si ay horomar u yeeshaan.

Shaqaalaha xoogsatada ah waxay nadiifiyaan oo dayactirayaan iskuulka.

Dugsiya qaarkood, ilaaliyeeyaal shisheeye (dugsiga dibadiisa ka socda) ayaa soo dhaweeya oo caruurta ku ilaaliya iskuulka dhexdiisa subaxda hora iyo galabta damba. Warktiyo qaarkoodna, way cuntaysiiyaan carurta wakhtiga duhurka.




## Dugsiga dhexe marka laga hadlo

Iskuuladu way ka weyn yihiin kuwa dugsiga hoose. Ardayda iyo shaqaalaha iskuulkuna way ka badan yihiin kuwa jooga dugsiga hoose.

Waxaa jira maamul dugsiyeed ku magac dheer préfet ama préfète hadii ay tahay haween marka ay tahay dugsiga dawlada (ama dugsiga rasmiga ah), iyo directeur ama directrice hadii ay tahay haween marka la joogo dugsiga madaxa banaan. waa agaasimaha guud iyo gorsheeyaha iskuulka.

Marka la joogo dugsiga dawlada (ama dugsiga rasmiga ah), waxaa jira proviseur, laakiin marka la taagan yahay dugsiga madaxa banaan kaasi waxa uu ku magac dheer yahay sous-directeur ama sous-directrice hadii ay tahay haween. Waa mid ku shaqa leh qorshaynta nidaamka shaqada ee dugsiga, waana ku xigeenka agaasimaha guud oo maamulka

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

haya marka u agaasimuhu joogin.


Xog-hayaha xafiiska wuxuu maamulaa shaqaalaha dugsiga.

L'économe (ama dhaqaale dhawraha) waa xisaabiyaha dugsiga. Wuxuu maamulaa maaliyada. Masal ahaan wuxuu nidaamiyaa gadashada qalabka macalimiinta, tigidhada cuntada, buugaka iskuulka.

Xoghaynta ardayda iyo ilaaliyada tababaraha ah.

Iyaga ayaa mas'uul ka ah inay u xakameeyaan ardayda soo galitaanka iyo ka bixitaanka iskuulka. Sidaa darteedna way xakameeyaan maqnaashaha ardayda. Waxay kormeeraan ardayda wakhtiyada nasashada iyo cuntada inta la joogo dugsiga. Waxay sameeyaan diiwaangelinta ardayda.Macalimiinta dugsiga dhexe (ama professeurs ku magac dheer) waa dumar iyo rag dhiga, caadi ahaan xiisad gaar ah (xisaab ama luqada faransiiska ama spoortiga, ...).waxbarashadoodu iyo shahaadadoodu waxay ku kooban yihiin xiisadaa gaarka ah. Sidaa awadeed, tiro ahaan waxaa isku dheeritiran xiisadaha ardaydu dhigtaan iyo macalimiinta udhigta. Way dhacdaa in macalimiin qaarkood ay dhigaan laba ama sadex xiisadood. marka ay tahay fasalka DASPA, Dugsiyo qaarkood waxa ay haystaan macalimiin kala dhigta xiisadaha kala duwan, laakiin wakhtiyo qaarkood way dhacdaa in macalin uu dhigo kaligii xiisadahaas oo dhan.

Xoogsatada dugsiga ayaa nadiifiya oo dayactira qolalka iyo goobaha wax lugu barto ee iskuulka. Hase ahaatee, nadaafada iskuulku waa mid loo wada siman yahay.





CROIX-ROUGE de Belgique

# Sidee u diwaangelin karaa cunugeyga?

Cunugayga waan ka diwaangalin kara iskuulka goor walba



Si aan u diwaangaliyo cunugayga, waa in aan isku raacno dugsiga. Shaqaalaha maamulka ee dugsiga ayaa ini waydiin doona dokimanti ama waraaqado si loo diwaangaliyo cunugaaga. Sidaa darteed waa muhiim inaad sidatiin sharciyadiina (annexe 26 ama oranji kaarte ama sharcigaad haysatid...). Diwaangalitaanka fasalka kowaad ee dugsiga dhexe, foom ayuu iskuulku isiin doonaa. Waa in aan buuxbuuxiyo foomkaas una geeyo dugsiga aan la rabo cunigayga. Go'aan ayaa markaas kadib la ii soo diri doonaa.

Maalinta laga diwaangalinayo ilmahayga iskuulka, waxaa la isiin doonaa Xeerarka arimaha gudaha (ROI), qorshaha tacliimeed ee dugsiga, xeerarka guud ee tacliinta iyo liisaska qalabka waxbarashada ee ardaygu in uu soo gato ah. Waxaa kaloo la isiin doonaa Magaca Xarunta cilmi nafsiga iyo caafimaadka bulshada ee loo yaqaan 'Psycho-Medico-Social Center (PMS) ee la shaqaysa dugsiga cunugayga. Maalintaas waa fursad aan ku heli karo macluumaad aan kuna booqdo iskuulka cunugayga.



Mararka qaarkood, boos la'aan ayaa ka jirta dugsigaan doortay. Taasaa sababtay, inaan ilmahayga ka diwaangalin karayn dugsigan. Laakiin, dugsigaas waxa waajib ku ah in uu isiiyo warqada ama cadeynta codsashada diiwaangelinta. Markaa kadib, waa inaan raadsado dugsi kale oo ilmahayga ka diiwaangalin karo. Sidaas awgeed, waxaan wici karaa xafiiska kaalmada diiwaangelinta ee Beesha ama qoomiyada faransiiska anigoo adeegsanaya lambarkooda telefonka ee bilaashka ah : 080018855 si uu iiga caawiyo raadinta dugsiga aan ka diwaangalin doono ilmahayga.

**Waxbarasha khasabka ah waa bilaash**

Sida ku dhigan dastuurka (xeerka 24aad) iyo qaraarka "Ergooyinka" (xeerka 100aad), dugsi aaditaanku wuxuu bilaash yahay ilaa dhamaadka waxbarashada khasabka ah.
Ficil ahaan, marka laga reebo iskuulada gaarka loo leeyahay, iskuulada oo dhan waxaa laga maalgeliyaa Ururka Wallonia-Brussels. Sidaa darteed dugsiga uu ilmahaagu dhigto wuxuu helaa gargaar maaliyadeed si loo bixiyo waxbarasho tayo leh (ama waxbarasho wanaagsan). Si kastaba ha noqotee, maaliyadani ma dabooleyso ama kuma filno qiimaha buuxa ee waxbarashada. Sidaa awgeed, kharashyada qaarkood waa lagaa dhaafi, kharashaadka kale laakiin waa khasab in aad bixisid, kharashya kalena waa laguu soo bandhigi karaa laakiin ikhtiyaar ayaad u leedahay in aad diidid. Kahor bilowga sannad dugsiyeedka, dugsiga ilmahaagu wuxuu kuu soo diri doonaa dukumenti ay ku qorantahay qiyaasta kharashka iyo sida loo qoondeeyo.
Haddii aad la kulanto dhibaatooyin dhaqaale oo kaa horjoogsanaya bixinta kharashyada waqtigii loo cayimay, ha ka waaban inaad dhibtaas kala hadashid madaxa dugsiga ama qof kasta oo mas'uul ka ah arrintan dugsiga dhexdiisa. Waxaa suuragal ah sida u badan, in la helo xal ku habboon qof kastaba.

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

# Waa sidee sanad dugsiyeedka Beljimku?

Sanad dugsiyeedka Beljamka wuxuu bilaabmaa, caadi ahaan, 1da Sebtember.

**Waqtiyada kala duwan ee sanadka waxaa jira fasax dugsiyeed sidatan ah :**

- Dhamaadka bisha Oktoobar iyo bilowga Noofembar: fasaxa deyrta ee loo yaqaan fasaxa Toussaint (oo ah 1 toddobaad).
- Dhamaadka Deseembar: fasaxyada jiilaalka ee loo yaqaan ciidaha Kirismaska (2 toddobaad).
- Bisha Febriyaari: fasaxa nasashada ah ee loo yaqaan fasaxyada Carnaval (1 toddobaad)
- Inta u dhaxaysa dhamaadka Maars iyo bilowga Abriil: fasaxyada gu'ga ee loo yaqaano fasaxyada ciidaha krismaska(2 toddobaad).
- Sannadku wuxuu dhammaadaa dabayaaqada bisha Juun. Markaa kadib, ardaydu waxay galaan laba bilood oo fasax ah.
- Waxa kale oo jira fasaxyo si rasmi ah looga aqoonsan yahay Beljimka. Kuwani waa maalmo ciido ah oo dugsiyada iyo maamulada iyo ganacsiyada qaarkood ay xiran yihiin.

Waxbarashada aasaasiga ah ama dugsiga hoose marka ay tahay, tirada iyo hababka loo maro imtixanaadka (ama qiimaynta cashirka) waxaay ku dhex qorantahay xeerarka arimaha gudaha (ROI).

Caadi ahaan, ardaydu waxaay maraan qiimeyn rasmi ah sanadka oo idil. Dhamaadka fasalka lixaad, cunugu waa inuu ku guulaystaa imtixaanka Shahaadada Waxbarashada Aasaasiga ah ee ku magac dheer "Certificat d'Enseignement de Base" (CEB). Haddii imtixaankaas uu ku guulaysto, cunugu wuxuu u talaabsanayaa waxbarashada dugsiga dhexe. Laakiin, haddii ilmahaagu aanu helin, waxaa loo dirayaa dugsiga dhexe ay wax ka dhiman yihiin (fiiri jaantuska ama tilmaamta sare ee sawirka ah).

Waxbarashada dugsiga dhexe marka ay tahay, imtixaanaadka waxaa inta badan la qabtaa bisha Deseembar ama Janawari iyo Juun. Markii imtixaannadan la saxo, dugsigu wuxuu siinaya ardayda buuga warbixinta jawaabta imtixaanada. Wargeysyo kalana waa la isiin doonaa si joogta ah sannad dugsiyeedka dhexdiisa si aan u la socdo horomarka ilmahayga.

Shirar u dhexeeya macallimiinta iyo waalidiinta ayaa la abaabulaa dhowr jeer sanadkii. Macallimiintu waxay ilga warami doonaan horamarka ilmahayga xaguu taagan yahay iyo sida uu udhaqmo cunugaygu fasalka dhexdiisa . Waxaa kaloo weydiin karaa su'aalo. Aad ayey muhiim u tahay inaan halkaas aado mar kasta.



Le calendrier scolaire de l'année en cours est consultable sur le site Internet suivant : **http://www.enseignement.be**

# Siduu u qorshaysan yahay usbuuca wax barashada? maalintana?

Usbuuc dugsiyeedku wuxuu bilaabmaa subaxnimada Isniinta wuxuuna dhammaadaa caadi ahaan Jimcaha saacadu markay tahay afarta galabnimo (loo yaqaan 16h) Guud ahaan, maalinta arbacada, carruurtu waxay dhigtaan iskuulka aroortii oo kaliya (mararka qaarkood ardayda la ganaaxo ayaa galabtii jooga iskuulka). Waxa kale oo jira mararka qaar cayaaro ama wakhti dhaafis oo la qabanqaabiyo gelinka dambe ee Arbacada.

Dugsi walba wuxuu go'aamiyaa wakhtiga bilowga iyo dhamaadka casharada. Tani waxay ku qeexan tahay xeerarka arimaha gudaha ee dugsiga (ROI). Maalin kasta carruurtu waxay haystaan wakhti kooban oo nasasho ah iyo wakhti qado, inta u dhexeysa casharada subaxda iyo galabta.


**Dugsiga hoose marka ay tahay:**

Maalin dugsiyeedku waxay bilaabataa, caadi ahaan, inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 9:00 subaxnimo. waxayna dhamaataa inta u dhexeysa 3:00 galabnimo (ama 15h00) iyo 4:00 galabnimo (ama 16h00).

**Dugsiga dhexe marka la joogo:**

Fasal kastaa wuxuu leeyahay jadwal u gaar ah. Bilowga sanadka, macalimiintu waxay ardayda siinayaan "jadwalka casharka". Dugsiga dhexe, casharradu ma bilaabmaan mana dhammaadaan maalin kasta waqti isku mid ah.

Dugsiga dhexe, kol hadii macalin kastaba dhigayo maado u gaar ah, macallimiintu way is beddelaan markasta ay ardaydu xiisad bilaabayso. Sidoo kale, ardaydu waxay iska baddelaan fasalada saacad kasta.



F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés


# Fasalka gudihiisa, xeerarkee lagu dhaqmaa?

Ardaydu waa inay yimaadaan dugsiga wakhtiga loogu talagalay. Dib-u-dhicytaanka aan macquulka aheyn waa mid ganaax keeni karaa.



Fasalka dhexdiisa, waa in aad dhageysataa macalinka. Si aad u hadashid, waa in aad gacanta kor u taagtid oo aad sugtid ogolaashaha macalinka. Waa in aad sidoo kale xushmeysaa qofka hadlaya oo aadnan hadalka ku jarin.

Waa muhiim in aad haysatid qalabkaaga oo dhan (buugaga la akhristo, buugaga wax lagu qoro, qalin, qalimaanta midabka leh...). Macalinku uu ganaaxi karaa ardayda aan haysanin alaabtooda. Dugsi walba iyo macalin waliba wuxuu codsan karaa shey gaar ah.



# Maxay yihiin ganaaxyadaa ka dhasha u hogaansan la'anta xeerarkan?

Ganaaxa nuucadiisu waxay kuxiran tahay inta ay taagan tahay ku xadgudubka xeerarka uu layimiday cunugaygu. Waxaa la iigusoo sheegi doonaa qoraal ahaan ganaax kasta oo lagu soo rogo cunuggayga.

Digniin ama soo samayn casharo dheeraad ah ayaa lagu dhex qori kara buuga wargalinta ee fasalka (ama joornaalka fasalka)

Ganaaxa ku magac dheer joogitaanka waa mid ku khasbaya cunugayga inuu dugsiga dhex joogo dhowr saacadood oo dheeraad ka ah saacadaha caadiga ah ee casharadiisa.

Ka-saarista fasalka si ku-meel-gaar ah waa nuuc ganaax ah oo dhigaya in cunugeygu laga mamnuuco inuu dhigto casharo qaarkood mudo dhowr saaco ah.

Ka-saarista ku-meel-gaarka ah macnaheedu waa in ilmahaygu aan awoodi doonin inuu ka qaybgalo dhammaan casharrada maalmo cayiman.

Ka saarida kama dambeysta ah micnaheedu waa in cunugeyga aanan lugu qaabili karayn hadeeto iskuulka, waana loo diidi doonaa in uu soo aado dugsigaas. Markaas waa inaad dugsi kale uraadisaa isaga. Ka hor inta aan ilmahayga dugsiga laga saarin, waa inuu iskuulku dhawr jeer ka soo dacwooda ardaygaas.

# Sidee loo dhigtaa casharada isboortiga ah?


Xiisada waxbarashada jimicsigu ama isboortiga waa waajib sida xiisadaha kale.

Cunugaygu waa inuu haystaa qalabkiisa jimicsiga: kabaha hoostoodu cadaanka yihiin, kalsoonka iyo garanka isboortiga (marka ay tahay dabaal barasho: kalsoonka iyo garanka  iyo koofiyada dabaasha iyo sidoo kale tuwaalka jidhka).




# Waa maxay buuga war bixinta fasalka?


Waa buugga uu cunugaygu, in uu ku qoro ay tahay maaddooyinka la baray, tababarka guriga (laylisyada iyo casharrada) oo ay tahay inuu ku sameeyo guriga. Waxuu noqon karaa xusuus-qor ama maalinle
Macalimiintu waxay ii soo diri doonaan macluumaad ama ra'yi ayagoo ku qoraya joornaalka ama buuga fasalkaan. Buugaas waxa kaluu noqdaa wadada wada xiriirka ah ee u-dhaxaysa dugsiga iyo qoysaska ardayda.
Cunugaygu waa inuu sitaa maalin walba joornaalka fasalka.
Waa inaan fiiriyaa oo saxeexaa buugaas si joogto ah.



# Dhex-dhexaadiyeyaasha dugsigu ayay yihiin, maxayna sameeyaan ?

Dhex-dhexaadiyeyaasha dugsigu waxay qayb ka yihiin nidaamka ay dejiyeen Ururka Wallonia-Brussels ee waxbarashada dugsiga dhexe. Waxay shaqadoodu tahay ka-hortaga maqnaanshaha ardayda iyo ladagaalanka rabshadaha ardaydu ku dhex samayso iskuulka.

Maamulayaasha dugsiga, macalimiinta, waalidiinta iyo ardayda ayaa adeegsan kara dhex-dhexaadiyeyaasha dugsiga. Hadafkoodu waa inay fudeydiyaan xidhiidhka ka dhexeeya dhamaan dadka ay qusayso waxbarashada ardayda.



# Cidee xiriirin karaa haddii cunugaygu la kulmo dhibaatooyin waxbarasho ?

Iskuulada qaar waxay soo bandhigaan xalal si ay u caawiyaan ardayda dhibaataysan. Waxaan weydiisan karaa inaan la kulmo macallimiinta si aan u ogaado waxa la sameyn karo si loo caawiyo cunugayga.
Haddii uu cunugaygu qabo dhibaatooyin ku saabsan waxbarashada, waxaa jira iskuulo-guri (ku magac dheer "Ecole Des Devoirs"). Iskuuladan way ka baxsan yihiin Dugsiga waxayna ka caawiyaan ama ay u jilciyaan cunugayga casharda kaladuwan ee dugsiga loogu soo dhigay. Qaarbaa laga yaabaa inay kugu soo dalacaan lacag.

Liiska iskuulada-guriga iyo faahfaahinta kaalmada ay ku siin karaan waxaad ka heli kartaa websaydka: www.ffedd.be

Laamaha adeega ka-tagista dugsiga ayaa caawin kara, in muddo ah, cunugayga haddii laga eryo dugsiga ama haddii uu si joogta ah udiido aaditaanka dugsiga isaga oo aanan laga eriyin dugsigaas.

Macluumaad dheeri ah, waxaad ka heli karta websaytka adeegyada sharciyaysan ee gargaarka dhallinyarada: www.aidealajeunesse.cfwb.be

### Xarumaha cilmu-nafsiga iyo caafimaadka bulshada ayaa, sidoo kale, caawimaad bixiya.

Dugsi kasta wuxuu kuxiran yahay xarunta PMS (Xaruunta cilmu-nafsiga iyo caafimaadka bulshada). Kooxaha ka shaqeeya xarumahan 'PMS' waxay ka kooban yihiin cilmi-nafsi yaqaanno, shaqaale bulsho iyo dhakhaatiir ama kalkaaliyeyaal caafimaad.

Waxay u joogaan inay dhagaystaan ardayda iyo qoysaskooda oo ay la raadiyaan habka loo xalin lahaa dhibaatooyinkooda (hanooninta dugsiga, dhibaatooyinka xiriirka). Hadafkoodu waa inay caawiyaan carruurta, dhalinyarada iyo waalidiintood. Waxay isticmaalaan farsamooyin fudaydinaya wanaajinta horoomarka ardayda, kuna taageeraya waxbarashadooda iyo habaysta noloshooda.

Xarumaha PMS sidoo kale waxay bixin karaan talo ku saabsan hanooninta ardayda. Shaqaalaha xarumaha 'PMS' waxa ku waajib ah inay ilaaliyaan sirta shaqada. Ma gudbin karaan macluumaadka lagu aaminay.

Maalinta iskuulka loo diiwaangalinayo cunugayga, waxaa la ii sheegi doonaa magaca xarunta PMS ee iskuulku ku lifaaqan yahay.

Waxaan weydiisan karaa inaan la kulmo Xarunta PMS ee ka shaqeysa dugsiga cunugeyga. Lakulankaas waa ee bilaash.






F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

# Cidee la xiriiri karaa haddii aan dhibaatooyin kale ku qabno dugsiga?

Haddii aan shaqaalaha dugsiga ka la kulmo dhib ku saabsan isfahan la'aan, waxaan la xiriiri karaa, magaalooyinka qaarkood marka la joogo, dhex-dhexaadiyeyaasha dhaqamada kala duwan. Waxay raadin doonaan inay wadahadal la yeeshaan dugsiga. Waxay iga caawin doonaan sidii aan isfahan u la yeelan lahaa shaqaalaha dugsiga.



Haddii cunugaygu yahay dhibbane midab-takoor ama marqaati ka yahay falalka cunsuriyadda, waa inaan tallaabo ka qaadaa. Tallaabada koowaad, waa inaan marka hore ogeysiiyaa shaqaalaha dugsiga. Waxaa kaloon ogeysiin karaa xaruunta cilmu-nafsiga iyo caafimaadka bulshada ee iskuulka loona yaqaan 'CPMS', kaasoo ka shaqayn doona is dhexgalka dhaqanka ardayda ee fasalka dhexdiisa. Intaa kadib, xaruumo ku takhasusay xuquuqul insaanka ayaa talooyin iyo caawimaad-ficil i siin kara. Sidoo kale, xarunta Fursadaha Loo Wada siman Yahay iyo la dagaalanka Midabtakoorka ayaa u jooga inay helaan oo wax ka qabtaan cabashooyinka midab kala sooca ama takooridda.

http://www.diversite.be

Agaasinka Guud ee Waxabarashada Waajibka ah ayaa sameeyay lambarka telefonka ee bilaashka ah kuna magac dheer « Ecole et parents » ama « dugsiga iyo waalidiinta » si loo wargaliyo waalidiinta ay awlaadoodu goobjoog ka noqdeen ama ay dhibbane ku yihiin rabshadaha iskuulka ka dhaca.

Ecole et Parents
0800/95 580
numéro gratuit d'information





CROIX-ROUGE de Belgique

# Maxaan sameeyaa haddii aan guuro?

Waa inaan u sheegaa maamulka iskuulka goorta cunugaygu iskuulka ka tagayo. Hadday suurtagasho, waxaan u diri doonaa dugsiga hore cinwaanka dugsiga cusub ee cunuggayga aan ka diiwaangaliyay.
Haddii cunugaygu ku jiro dugsiga aasaasiga ah: dugsiga uu ilmahaygu ka baxayo ayaa i siin doonaa dukumeenti. Marka dukumintigan aan anigu buuxiyo, waxaan u diri doonaa dugsiga cusub. Dugsiga dhexe marka ay tahay, maamulka iskuulka cusub ee cunugeyga wuxuu la xiriiri doonaa maamulka iskuulka hore si uu wax ogaal uga noqdo xaalada hora ee wax-barashada cunugayga.



# Xagee baan ka baran karaa faransiiska?

Xaruumaha qaarkood ee lagu soo dhaweeyo magangaliyo-doonka ee Laanqayrta Cas ee Beljimka ayaa laga dhex bixiyaa casharo Faransiis ah.
Ururo ka jira magaalooyin badan ayaa sidoo kale bixiya koorsooyin ku saabsan barashada Faransiiska. Faahfaahinta xiriirka ee ururadan waxaa lagala heli karaa websaytka hagaha bulshada ee hoostan ku dhigan.

http://www.guidesocial.be/

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

# Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

## Khadadka interneetka :

www.enseignement.be (liiska iskuulada leh DASPA, liiska Xarumaha PMS ee ku xiran iskuulada, sharaxyada barnaamijyada tacliinta iyo marxaladaha kala duwan ee iskuulada, isdiiwaangalinta...)
www.devenirKLK1.be (doorashada nuuca tababarka ama tacliin )
www.orientation.be (hanooninta)
www.siep.be (jihaynta iyo doorashada tababarka)
www.aidealajeunesse.cfwb.be >> qaybta adeegyada la oqoonsan yahay (Liiska AMO dhammaanteed) ( Caawinta adeega jawiga furan)
www.cire.be (laanta turjumaada iyo casharrada Faransiiska ah...)
www.ffedd.be (iskuulada gargaarka cashirka)
www.guidesocial.be (goobta guud ee ay ku jiraan cinwaanada iyo lambarrada taleefanka ay leeyihiin ururada bixiya adeegyada la xiriira waxbarashada, hanuuninta, tababarka iyo kor u qaadista dugsiga...)
www.diversite.be (Xarunta Fursadaha loo wada siman yahay iyo la dagaalanka Midab-kala-sooca)

## Lambarada taleefoonada waxtarka leh :

Xajiso lambarka bilaashka ah ee ku magac dheer Iskuulka iyo waalidiinta: **0800/95 580**. Lambarkaas waxaa wici kartaa Isniinta ilaa Jimcaha 9h ilaa 13h. Lambarkaas wuxuu ka hawl galaa arrimaha la xiriira rabshadaha ka dhaca iskuulka dhexdiisa oo kaliya.

Adeegga kaalmada diiwaangelinta : **0800/188 55**

## Cinwaannada :

**SIEP : Service d'Information sur les Etudes et les Professions**
**(Adeegga Macluumaadka Daraasaadka iyo Xirfadaha) oo xafiisyadiisa laga helo :**

| | | |
|---|---|---|
| Bruxelles : | 109-111, Rue de la Poste, 1030 Bruxelles | • 02/640 08 32 |
| Charleroi : | 51, Boulevard P. Janson, 6000 Charleroi | • 071/33 12 06 |
| Liège : | 26, Rue Saint-Gilles, 4000 Liège | • 04/222 08 78 |
| Mons : | 101, Chaussée de Binche, bloc C, 7000 Mons | • 065/33 48 22 |
| Namur : | 12, Rue de Saintraint, 5000 Namur | • 081/25 14 00 |
| Wavre : | 13, Rue de Flandre, 1300 Wavre | • 010/47 10 80 |
| Libramont : | 39A, Grand Rue, 6800 Libramont-Chevigny | • 061/21 32 21 |





CROIX-ROUGE de Belgique

# Hingaadista

**Ururka waalidiinta :** waa koox ay samaysteen waalidiinta ardayda oo doonaya inay la shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga si loo wanaajiyo horomarka ardayda. Ururkaas waa xiriiriyaha ka dhexeeya shaqaalaha iskuulka iyo waalidiinta ardayda.

**DASPA :** Nidaamka soo dhaweynta iyo iskuul-dhigashada ee loogu talagalay ardayda ku cusub dalka iyo barashada degdega ah ee luqada faransiiska.

**Golaha Is dhexgalka :** Waxuu ka kooban yahay macalimiinta fasalada ay dhigtaan ardayda la da'da ah cunugaaga, waxaana golahaas gudoomiye ka ah maamulka iskuulka. Wuxuu ujeedadiisu yahay inuu ardayda DASPA ku daro fasalada caadiga ah iyadoo loo eegayo dadaalka uu layimid ardaygu.

**Koorsada Dhaqanka :** Koorsada loogu talagalay in lagu baro ardayda xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka, aasaaska dimuqraadiyadda, xorriyadda, wada hadalka, iyo sidii loo horomarin lahaa fikirkooda gaarka ah.

**Shaqa-guriyeedka :** Laylisyo, casharo waxbarasho ah oo laga rabo ardayda in ay soo sameeyaan wakhtiyada ka baxsan saacadaha fasalka. Waxaa bixiya macalinka.

**Dibloomada:** Dukumenti cadeynaya inuu qof ku aflaxay imtixaanka.

**Iskuulada madaxa banaan ama xorta ah:** Waxbarashada waxaa soo abaabulay urur diimeed ama ururo bulsheed.

**Dugsiyo rasmi ah (dawladeed) :** waxbarshada waxaa qaban qaabiya maamul dawladeedka.

**Ardayga xorta ah :** Waa ardayga aanan buuxin shuruudaha sanad-dugsiyeedka ee aflaxaada waxbarasho iyo / ama aan buuxin shuruudaha waajibka ah ee iskuul aaditaanka. Sanaddiisa waxbarasho lama tixgelin doono kumana sii hor mari doono tacliinta sannadka soo socda.

**Imtixaan dugsiyeedka:** Imtixaanno qoraal ah ama afka ah oo lagu qiimeeyo xirfadaha ardayda.

**Buuga fasalka :** waa buuga xusuus-qorka ay ku qoraan ardaydu jadwalka casharka, shaqo-dugsiyeedka (layliyo iyo casharro) lagu sameeyo guriga. Buugaas, sidoo kalee, wuxuu fasaxayaa inay waalidiintu iyo macallimiintu ku wada xiriiraan qoraal.

**Cadaysta maqnaanshaha :** Ukeenitaanka maamulka iskuulka warqad sharxaysa sababaha maqnaanshaha cunugaaga adigoo xafidaya waqtiga loo cayimay ee ku xusan qawaaniinta (tusaale: cadeynta uu bixiyay dhakhtarku).

**Xeerarka Gudaha (ROI) :** waa dukimiinti la siiyo waalidiinta marka cunugooda loo diiwaangelinayo dugsiga, soona bandhigaya qawaaniinta kala duwan ee nolosha dugsiga. Dukimiintigaas waxuu kaloo soo bandhigayaa ganaaxa suurtagalka ah haddii ay dhacdo in aanan loo hoggaansamin sharciyadan.

F.E.R.
Fonds Européen pour les Réfugiés

# sharaxaada shahaadooyinka

## SHAHAADOOYINKA (dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe)

Ardaydu waxay qaataan shahaadooyin (diblooma) qaas u ah «fasalooyinka muhiimka ah» ay soo dhigteen. shahaadooyinkaas waxaa kamid ah :

- C.E.B. (« Certificat d'Etudes de Base » ama shahaadada waxbarashada aasaasiga ah) : dhamaadka waxbarashada dugsiga hoose
- C.E.1.D. [«Certificat d'Enseignement secondaire du 1er degré » ama shahaadada heerka 1aad ee dugsiga dhexe]: dhamaadka heerka 1aad ee dugsiga dhexe.
- C.E.2.D. [« Certificat d'enseignement secondaire du 2ème Degré» ama shahaadada heerka 2aad ee dugsiga dhexe]: dhamaadka sanadka 4aad ee dugsiga dhexe
- C.E.S.S. [« Certificat d'Enseignement Secondaire Supérieur » ama shahaadada qaybta sare ee dugsiga dhexe]: dhamaadka sanadka 6aad ee dugsiga dhexe ee caadiga ah, iyo dugsiga dhexe ee farsamada gacanta ama farshaxanka ah ama dhamaadka sanadka 7aad ee waxbarashada dugsiga dhexe ee tababarka shaqooyinka ah (shahaadadaas waxay fasaxaysaa in dugsiga sare loo talaabo).
- C.Q.6 [« Certificat de Qualification 6 » ama shahaado aqoonsiga 6]: dhamaadka sanad aqoonsiga 6aad ee dugsiga dhexe
- C.Q.7 [« Certificat de Qualification 7 » ama shahaado aqoonsiga 7]: dhamaadka sanad aqoonsiga 7aad ee dugsiga dhexe
- C.E.P.6 [« Certificat d'études de 6ème année de l'enseignement Professionnel » Shahaadada waxbarashada ee sanadka 6aad ee ku saabsan waxbarashada xirfadaha]: waa dhamaadka sanadka 6aad ee barashada xirfadaha ah.

Shahaadada Dugsiga Dhexe ee Dhammeystirka oo ku saabsan qaybta «Kalkaaliso Caafimaad» ayaa la bixiya dhamaadka heerka afaraad ee waxbarashada xirfadeed ee dhammaystirka ah (E.P.S.C)

Shahaadada Aqoonta maaraynta dhaqaale ee Aasaasiga ah waxaa la siiyaa ardayda ku guulaysatay xirfadaha gaarka ah ee maaraynta dhaqaalaha.

## SHAHAADOOYINKA (dugsiga dhexe)

Marka la joogo «heerka labaad» (oo ah sanad dugsiyeedka 3aad iyo 4aad) iyo «heerka saddexaad» (oo ah sanad dugsiyeedka 5aad iyo 6aad) ee waxbarashada dugsiga dhexe, agaasimayaashu waxay bixiyaan mid ka mid ah «shahaadooyinka» soo socda dhamaadka sanad dugsiyeed kasta:

- **AOA** (Attestation d'Orientation A - ama Shahaadada hanooninta A): waa guul dhammaystiran (ardaygu uu ka gudbayaa fasalka, wuxuuna dooran karaa nooca iyo qaabka waxbarashadiisa ee sanadka soo socda)
- **AOB** (Attestation d'Orientation B - ama Shahaadada Hanooninta B): waa guul xadaysan (ardaygu uu ka gudbi doonaa fasalka laakiin doorashada tacliintiisa soo socota waxaa lagu xaddiday xannibaadda ay ku dhex dhigeen macallimiintu shirka ay qabteen dhamaadka sannad dugsiyeedka). Golaha fasalka ee macalimiintu ma bixiyo shahaadada AOB dhamaadka sanad dugsiyeedka shanaad ee qaybta kala guurka ah ama kala wareega ah.
- **AOC** (Attestation d'Orientation C ama shahaadada hanooninta C) : waa guuldaraysiga imtixaanada (ardayga wuxuu mutaysanayaa ku celiska waajibka ah ee fasalka).

Way ku mahadsan yihiin, hambalyo ayaana u dirayaa sawiryahannadeena!







CROIX-ROUGE
de Belgique

www.lamaisondugraphisme.be